



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 24, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka Ujeedada: Isbeddelada dhanka siyaasada ee ODDS COVID-19 ee soo socda

Bishii Maajo 11, 2021 Guddoomiyaha Gobolka ee Kate Brown ayaa ku dhawaaqday in marka boqolkiiba 70 dadka reer Oregon ee da'doodu tahay 16 iyo ka weyn ay ugu yaraan qaataan qiyaasta koowaad ee tallaalka COVID-19, in la qaadi doono inta badan xayiraadaha.

Marka ay tani dhacdo, siyaasadaha Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) qaybtiisa COVID-19 wuu isbeddeli doonaa. Waxaa jiri doona muddo 7 maalmood ah oo loogu talagalay in ay dadku kula qabsadaan siyaasadaha iyo hababka wax loo qabto marka la qaado xayiraadaha. Hoosta waxaa ku qoran macluumaad aad u baahan tahay in aad ogaado hadda si aad u diyaar garowdo marka xayiraadahaasi la qaado.

Marka hore, waxaa la filayaa in tilmaamaha maaskaruhu uu isku beddeli doonto, sida soo socota:

- ODDS ayaa qaadi doonta shuruudaha maaskaraha ee loogu talagalay guriga-dhexdiisa, ilmo korsiga, iyo daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay, iyo sidoo kale shaqaaleynta fool ka fool ah iyo taageerada hawlaha maalintii (DSA). ODDS waxay kula talineysaa daryeel bixiyeyaashu in ay sii wataan xirashada maaskaraha, gaar ahaan haddii dadku yihiin kuwo aan la tallaalin ama difaaca jirkoodu liito, balse hadda ka dib loogama baahan doono goobahani.
- Maaskaraha waxaa looga baahnaan doonaa shaqo kooxeedka iyo adeegyada kooxda ee DSA.

- Dadka ka tirsan adeegyadu waxay daryeel bixiyahooda ka codsan karaan in uu sii wado xirashada maaskaraha xataa ka dib marka la qaado xayiraadaha oo hadda ay tahay in ay bilaabaan wada hadaladaasi.
- Hay'adaha daryeelka bixiya waa in ay qaataan waqti ay ugu diyaar garoobaan siyaasada maaskaraha ee loogu talagalay in ay shaqaaluhu raacaan kaasi oo la raacayo Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Badbaadada Shaqada iyo Maamulka Caafimaadka (OSHA), haddii aan taasi hore loo dhammeystirin.

ODDS waxay sidoo kale filaysaa in si shakhsi ahaan shaqada loogu soo noqdo oo ay ku jiraan:

- Waxaa jiri doona in si shakhsi ahaan oo wajiyo kala duwan leh loogu soo noqdo adeegyada maamulka kiiska.
- Hawlaha ruqsad bixinta ee shakhsi ahaaneed ayaa dib u bilaabmi doona.
- Hawlaha shakhsi ahaaneed ayay dhici kartaa in ay dib u bilaabmaan
- Ku soo wareega guryaha la degan yahay (ilmo korsiga iyo kuwa koox ahaanta loo degan yahay) ayaa dib u bilaabmi doona.

Isbeddeladani waxay dhaqan gali doonaan isla marka Oregon ay gaarto hadafkaasi ah boqolkiiba 70 ee Guddoomiyaha Gobolkuna qaado xayiraadaha. Weli ma ogin marka ay taasi dhici doonto. ODDS waxay rabtaa in ay xaqiijiso in dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka, qoysaska, daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiisku ay yihiin kuwa diyaar ah oo ay hadda yeelanayaan wada hadalo loogu talagalay marka la qaado inta badan xayiraadaha.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.